DUGSIGA MADAXA BANNAAN EE DEGMADA 196
Dugsiyada Dadweynaha Rosemount-Apple Valley-Eagan
Waxbarida, Kobcinta, iyo dhiirigelinta ardaydeena si ay uga gaadhaan nolosha guul waarta.

Somali

Lambarka Gaarka u ah **505.3.1P** La-qaatay **Juun 1980** Dib wax looga badalay **Febraayo 2024**

Cinwaanka **Ogaysiis Dadweyne – Ogaysiiska Sannadlaha ah ee ku saabsan Xaquuqaha, Ilaalinta, iyo Qarsoonaanta Diwaanada Ardayga**

1. **Go'aan**

1.1 Si waafaqsan shuruudaha Sharciga Maamulka 505.2AR, Ilaalinta iyo Qarsoonaanta Xogaha Ardayga, iyo shuruudaha sharciga federaalka (34 C.F.R. Farqada 99.7), waxyaabaha soo socda waxay ka kooban yihiin ogaysiiska sannadlaha ah ee loo diro waalidiinta, mas'uuliyiinta iyo ardayda kaasoo ku saabsan habdhaqanada qarsoonaanta xogaha ee degmada.

1.2 Sharciga Maamulka 505.2AR, Ilaalinta iyo Qarsoonaanta Xogaha Ardayga, wuxuu la shaqeeyaa shuruudaha gobolka iyo kuwa federaalka ee ku saabsan xaquuqaha qarsoonaanta xogaha waxbarashada ee ardayga, sida hoos lagu soo koobay.

2. **Xuquuqda Asturnaanta**

2.1 Xogaha waxbarasho ee lagu garto ama loo isticmaali karo in lagu garto ardayga, oo aan ahayn macluumaadka maamulka looma sii gudbin karo xubnaha dadweynaha iyada oo aan fasax qoraal ah laga helin waalidka ardayga ama mas'uulka, ama ardayga haddii ardaygu jiro da'da 18 sanno ama ka weyn yahay ama uu dhiganayo hay'ad waxbarasho oo dugsiga sare ka danbaysa ama haddii kale sharcigu u ogolaado maahane. Qaanuunkan guud wuxuu ku saleysan yahay qodobo gaar ah oo xadidan, oo lagu qeexay Sharciga Maamulka 505.2AR, Ilaalinta iyo Qarsoonaanta Xogaha Ardayga.

2.2 Hal ka reebban, oo oggolaanaya shaac ka qaadista diiwaannada waxbarashadda iyada oo aan oggolaansho la helin, waa in la siidaayo saraakiisha dugsiga ee leh danaha waxbarasho ee sharciga ah. Sarkaalka iskuulka waa qof iskuulka u shaqeeya sida maamule, kormeere, macalin, ama shaqaale taageera; qof ka shaqeeya Guddida Dugsiga; shaqsi ama shirkad uu iskuul la galay qandaraas si ay u bixiso adeeg halkii ay adeegsan lahayd shaqaalaheeda ama saraakiisheeda oo ay ku jiraan caymiska degmada ama tabaruce la oggol yahay. Danaha waxbarasho ee sharciga ah waxaa ka mid ah kuwa sida tooska ah ula xiriira mas'uuliyadaha sarkaalka dugsiga ee tilmaamaha fasalka, barida, qiimeynta iyo cilmibaarista, kasbashada ardayga iyo horumarka, edebta ardayga, caafimaadka ardayga ama daryeelka, ama masuuliyadaha xirfadeed ee sharciga ah.

3. **Macluumaadka Maamulka**

3.1 "Macluumaadka maamulka"

3.1.1 Waxaa ku jira magaca ardayga, taariikhda iyo goobta uu ku dhashay, maadada ugu muhiimsan ee waxbarashada, ka qaybgalka iyo waxqabadka sida rasmiga ah loo aqoonsan yahay hawlaha iyo ciyaaraha, miisaanka iyo dhererka xubnaha kooxaha ciyaaraha fudud, taariikhaha imaanshaha, heerka diiwaangelinta, ciwaanka iimaylka ee degmadu bixisay, heerka Shahaadooyinka fasalka, shahaado sharafyo, shahaadooyin iyo abaal-marinno la helay, liiska maamuuska, imaanshaha dugsiga, hay'addii hore ee waxbarashada ama machadyadii ugu dambeeyay ee ka qayb-galay, sawirro iyo muuqaallo kale oo muuqaal iyo maqal ah (daabacaad dugsi ku meel-gaadh ah, buug-sannadeed, wargeysyo, bandhigyo dadweyne, calaamado aqoonsi. , iyo daabacaadda boggaga intarnatka ee dugsigu ansixiyay) iyo lambarada aqoonsiga ardayga (ID), aqoonsiga isticmaalaha ama aqoonsiyada kale ee gaarka ah ee ardaygu u isticmaalo ujeedooyinka gelitaanka ama xidhiidhka hababka elagtarooniga ah ama lagu soo bandhigay calaamada aqoonsiga.

3.1.2 Aqoonsiga ardayga ayaa ah macluumaadka tusaha laakiin diiwaannada waxbarashadda kaliya ayaa la heli karaa iyada oo la adeegsanayo lambarka sirta ah ama lambarka aqoonsiga shaqsiyeed (PIN) ama shey kale oo loo yaqaan ama haysto kaliya isticmaale loo oggolaaday.

3.1.3 Macluumaadka tusaha kama mid aha aqoonsashada macluumaadka tilmaamaya diinta, jinsiyadda, midabka, curyaanimada, booska bulshada ama dhalashada.

3.1.2 Macluumaadka maamulka waxaa sidoo kale ku jira cinwaannada guriga iyo lambarrada taleefanka guriga ee ardayda fasallada 11 illaa 12, ujeeddada loogu talagalay in macluumaadkaas oo kale la siiyo saraakiisha qoritaanka militariga sida ay codsadeen militariga iyo xarumaha waxbarashada sare sida ay codsadeen xarumuhu, si waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka.

3.1.3 Macluumaadka tusaha sidoo kale waxaa ka mid ah cinwaannada guriga, lambarrada taleefannada, jadwalka dugsiga, diiwaangelinta xaadiritaanka maalinlaha ah iyo waalidiinta ama magacyada mas'uulka ah, cinwaanka iimaylka iyo lambarka taleefanka iyadoo ujeedadu tahay siinta macluumaadka Saraakiisha hirgalinta sharciga.

3.1.4 Macluumaadka Maamulka sidoo kale waxaa ku jira cinwaannada guriga, iyo lambarada taleefanada ujeeddada loogu talagalay in macluumaadkaas la siiyo Maktabada Degmada Dakota.

3.2 Sida waafaqsan Xeerka Hawlaha Xogta ee Minnesota iyo sharciga federaalka oo degmadu waa in ay saraakiisha qorista ciidanka qaabilsan ee militariga iyo xarumaha waxbarashada sare ugu soo gudbisaa magacyada, ciwaanada guriga iyo lambarada taleefanka ardayda fasalada 11aad iyo 12aad 60 maalmood gudahood kaddib taariikhda codsiga, ilaa iyo in waalidka ama ardayga qaangaadhka ah uu diido gudbinta macluumaadka. Sidaa darteed, ciwaanada ardayga iyo lambarka taleefanka ardayga waxaa kaliya laga ururin doonaa ardayda fasalada 11aad iyo 12aad, ayada oo ujeedada kaliya ee laga leeyahay ay tahay in macluumaadka la siiyo saraakiisha qoraysa militariga iyo hay'adaha waxbarashada sare.

3.3 Macluumaadka maamulka waxaa loo gudbin karaa dadweynaha iyadoo aan la haysan oggolaansho hore oo waalid, mas'uul ama aqbalaadda ardayga in waalidku, ama ardaygu (haddii ardaygu yahay 18 ama ka weyn yahay) uu ku diido qaab qoraal ah maahane gudbinta mid ama in ka badan oo ah macluumaadka noocaas ah.

3.4 Waalidka(diinta), mas'uulka(liyiinta), ama ardayda 18 jirka ah ama ka weyn ayaa diidi kara gudbinta macluumaadka maamulka iyaga oo helaya Nidaamka 505.2.4.3P, Diiditaanka Gudbinta Maamulka iyo Macluumaadka Buug sannadeedka. Foomka waa in la buuxiyaa oo lagu soo celiyaa dugsiga ardaygaaga. Waalid/masuulka kama hor istaagi karo shaac ka qaadista magaca ardayga, aqoonsiga ama cinwaanka iimaylka ay degmadu siisay ee fasalka ardayga lagu diiwaangeliyay ama calaamadda ardayga.

3.5 Haddii la xareeyo, diidmada gudbinta macluumaadka ayaa sii jiraya illaa laga beddelayo ama laga wareejiyo waalidka, mas'uulka ama ardayga u-qalma.

4. **Baaritaanka Xogaha** – Waalidka(diinta), mas'uulka(liyiinta) ama ardayga 18 sanno jirka ah ama kasii weyn, waxay codsan karaan inay baaraan oo ay dib u eegaan mid kasta oo ka mid ah xogaha waxbarasho ee ardayga marka laga reebo kuwa, sharciga gobolka ama federaalka, uu ka dhigayo mid qarsoon.

4.1 Degmadu waxay u hoggaansami doontaa codsiga sida ugu dhaqsaha badan haddii ay suuroggal tahay iyo, haddii kale, 10 maalmood gudohood oo anay ku jirin maalmaha fasaxa todobaadka iyo fasaxyadu.

4.2 Nuqulada diiwaannada waxaa lagu heli karaa codsi qoraal ah. Ujrada gacan ku haynta iyo koobiyeynta ayaa lagaa qaadi doonaa.

5. **Doodaha ku saabsan Sax ahaanshaha Xogaha** – Waalid, mas'uul ama arday da'diisu tahay 18 ama ka weyn oo aaminsan in macluumaad gaar ah oo ku jira xogaha waxbarasho ee ardayga aysan sax ahayn, marin habaabeen, aysan dhammaystirnayn ama ku xadgudbaya qarsoonaanta ama xuquuqaha kale ee ardayga, waxay codsan karaan degmadu inay wax ka beddesho xogta doodu ka taagan tahay. Waxaa dood lagu keeni karaa ayada oo la codsanayo lana soo gudbinayo Hanaanka 505.2.11P (Procedure 505.2.11P), Codsiga Waxkabadalka Xogaha Waxbarashada, Kormeeraha guud ee Independent School District 196, 3455 153rd Street West, Rosemount, Minnesota 55068-4946.

5.1 Haddii Kormeeraha guud uu iska diido in uu wax ooga badalo xogaha sida looga codsaday 30 maalmood gudahood, waalidka, mas'uulka, ama ardayga 18 sano jirka ah ama ka weyn, waxaa lagu wargalin doonaa ayaga oo qoraal ah xaquuqdiisa codsashada iyo helitaanka dhegaysiga.

5.2 Haddii midkood Kormeeraha guud ama, dhegaysiga kaddib, sarkaalka dhegaysiga qaabilsan ee dugsigu magacaabay, uu go'aamiyo in xogta dooddu ka taagan tahay ay tahay mid aans ax ahayn, marin habaabin ah, aan dhammaystirnayn ama ku xadgudbaysa sirta ama xaquuqaha kale ee ardayga, xogta wax ka badal ayaa lagu samayn doonaa, waalidka, mas'uulka, ama ardayga da'diisu tahay 18 sano ama kasii weyn waxaa lagu wargalin doonaa isbadalka, iskuday ayaa la samayn doonaa si loo ogaysiiyo xogta dadkii horey u heli jiray.

5.3 Haddii, ayada oo uu dhegaysigu sabab u yahay, la go'aamiyo in xogta dooda laga keenay ay tahay mid aan sax ahayn, marin habaabin ah, aan dhammaystirnayn ama xadgudub ku ah qarsoonaanta xaquuqaha kale ee ardayga, waalidka, mas'uulka, ama ardayga da'diisu 18 sano tahay ama ka weyn, waxaa lagu wargalin doonaa in uu xaq u leeyahay in uu warbixin ka diyaariyo xogta taasoo ka faaloonaysa uuna diyaariyo sababta uu ku diidanyahay go'aanka degmada.

5.4 Go'aanka Kormeeeraha guud ee ah in uu yahay sarkaalka mas'uulka ka ah ama sarkaalka dhegaysiga dacwadda waxaa laga yaabaa, ayada oo kaliya la tixgalinayo sax ahaanshaha iyo dhammaystirnaanshaha xogaha, in racfaan laga qaato si waafaqsan shuruucda khusaysa ee Xeerka Nidaamada Maamulka ee Gobolka, Cutubka 14 Xeerka Minnesota(Minnesota Statute Chapter 14), kaasoo khuseeya kiisaska la isku hayo.

5.5 Heerka gaarsiisan in xog lagu sheego mid marin habaabin ah ama ku xadgudbaysa qarsoonaanta ama xaquuqaha kale ee ardayga, ayada oo ku xadgudbaysa Xeerka Xaquuqaha Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoonaanta(Family Educational Rights and Privacy Act) (FERPA) (20 U.S.C. Farqada 1232[g] and 34 C.F.R. Qaybta 99), sharciga gobolka iyo kan federaalka midkoodna racfaan ma bixiyo.

6. **Ujeeddooyinka Xogta Waxbarashada Gaarka ah: Codsiga Baabi'inta** – District 196 waxay u hogaansamaysaa 34 C.F.R. Cutubka III Farqada 300.624. Waqtiga qalin-jabinta ama marka ardaygu uu dhaafo dada u-qalmitaanka adeegyada waxbarashada gaarka ah, xogaha waxbarashadda gaarka ah looma baahna si ay sii siiyaan adeegyada waxbarashada canugga.

6.1 Codsiyada baabi'inta diiwaannada waxbarashada gaarka ah waxaa lagu sameyn karaa:

6.1.1 Ardaygii qalin jabiyay, 18 jir ama ka weyn, ama

6.1.2 Ardaygii aan qalin jabin, 22 jir ama ka weyn, ama

6.1.3 Waalidka ama mas'uulka ardayga 17 jirka ah- ama ka yar ee qalin jabiyay, ama

6.1.4 Qof loo xilsaaray mas'uuliyadda arday hore oo naafo ah oo aan xaq u lahayn adeegyada waxbarashada gaarka ah.

6.2 Xogaha waxbarashadda gaarka ah waxaa lagu qeexaa xog kasta oo lagu keydiyo faylasha waxbarashada degmada ee ay kujiraan foomka gudbinta iyo tillaabada xigta ee qiimeynta iyo/ama qiimeynta, oo ay kujirto: xogta ceyriin, xog kasta ee shaqaaleynta iyo/ama kulanka kooxda, iyo qorshaha waxbarashada shaqsiyeed. (IEP), warbixinta horumarka iyo dib u eegista sanadlaha ah.

6.2.1 Xogta waxbarashada gaarka ah waxaa kamid ah walow aysan ku koobnayn foomamka waxbarashada ardayga ee ku calaamadaysan CS99 iyo xog kasta oo taageeraysa, iyo sidaasoo kale foomamka la sugayo ee DP1 ilaa DP12 iyo xogta taageeraysa, iyo foomam kasta oo iskumid ah ee laga isticmaalay degmada kahor inta aan la soo saarin foomamka hadda la isticmaalayo.

6.2.2 Xogaha waxbarashada gaarka ah waxaa kamid ah xogaha ardayda loo gudbiyay adeeg waxbarasho oo gaar ah iyo qiimaynta la diiday; loo gudbiyay adeeg waxbarasho oo gaar ah, adeegga la qiimeeyay oo la diiday; iyo/ama adeegga la qiimeeyay oo la siiyay.

6.2.3 Waxaa jiri kara xaalado agaasimaha waxabarashada gaarka ah uu u baahan karo in uu go'aamiyo in xoguhu yihiin xogo waxbarasho gaar ah iyo in kale.

6.3 Ardaygii hore ee District 196 (ama waalidkii ama mas'uulka ardayga noocan ah) ee ay khusayso xogta waxbarashada gaarka ah wuxuu codsan karaa in la baabi'iyo xogta waxbarashada qaarka ah isagoo wacaya 651-423-7628 ama warqad u qora agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee School District 196, 3455 153rd Street West, Rosemount, Minnesota, 55068-4946.

6.4 Ardayda hore ee shaki ka qaba inay khusayso xogta waxbarashada gaarka ah ama doonaya macluumaad dheeri ah oo ku saabsan baabi'inta xogta waxay soo wici karaan 651-423-7628 si go'aan looga gaaro. Haddii xoguhu yihiin kuwa jira, ardayga hore wuxuu codsan karaa in la baabi'iyo xogta asaga oo waraaq u qoraya agaasimaha waxbarashada gaarka ah Independent School District 196, 3455 153rd Street West, Rosemount, Minnesota, 55068-4946.

6.5 Sida uu dhigayo sharciga federaalka, baabi'inta waxay macnaheedu noqon kartaa ka saarista muuqata ee waxyaabaha shakhsi ahaan lagu aqoonsanayo oo laga saaro macluumaadka si macluumaadka aan loogu sii aqoonsan karin shaqsi ahaan. Xulashada habka baabi'inta waxay guud ahaan hoos timaadaa degmo dugsiyeedka.

6.6 Degmadu 196 waa inaysan baabi'in wax diiwaano waxbarasho ah haddii ay jirto codsi weyn oo lagu baadho ama dib u eegis loogu sameeyo diiwaanada. Intaa waxaa dheer, in kasta oo codsi lagu baabi'inayo diiwaannada, degmadu waxay ilaalin kartaa diiwaannada qaarkood ee lagama maarmaanka u ah u hoggaansanaanta Sharciga Bixinta Waxbarashada Guud (GEPA), taas oo u baahan in dadka qaata lacagaha fadaraalka ay hayaan diiwaannada la xidhiidha isticmaalka lacagahaas.

6.7 Marka ay tixgalinayaan codsiga burburinta diiwaanada, qoysasku waa inay tixgeliyaan in ardaygu rabo inuu sii hayo diiwaanada waxbarashada gaarka ah ee ujeedooyinka dhokumentiyada mustaqbalka, sida codsashada kababka SSI.

7. **U wareejinta Xogaha Dusiyo Kale** – Degmada 196 waxay u gudbisaa xogaha waxbarasho oo ay kujirto xogta anshaxa ee ardayda dugsiyo kale iyo degmo dugsiyeedka ardaygu uu raadinayo ama ku talajiro inuu iska diiwaangaliyo markay codsadaan dugsigaas ama dugsiga degmada. Waalid, mas'uul ama arday da'diisu tahay 18 sano ayaa codsan kara oo heli kara nuqul xogaha la wareejiyey ah waxaana laga yaabaa, iyada oo la raacayo siyaasaddaan, in dood ka imaan karto sax ahaanshaha xogahaan.. Degmadu, si kastaba ha ahaatee, ma ogeysiineyso waalidka(diinta), masuulka(liyiinta), ama ardayda da'doodu tahay 18 ama ka weyn kahor wareejinta noocan ah.

8. **Noocyada iyo Ujeeddooyinka Ururinta Xogta: Xaquuqda Diidmada iyo Diidmo la'aanta**

8.1 Barnaamijyada waxbarasho ee ay maamusho degmadu waxay ku lug leeyihiin soo gudbinta ardayda ee layliyada, warbixinnada iyo, mararka qaar, qaadista imtixaannada. Degmadu sidoo kale waxay aruurin kartaa macluumaadka ujeeddooyinka diiwaangelinta ardayda, maamulka barnaamijyada dugsiyo kala duwan iyo ujeedo caafimaad iyo badbaado ardayda.

8.1.1 Macluumaadka loo baahan yahay inay soo gudbiyaan ardeyda ee la xiriirta warbixinnada noocaan ah, layliyada iyo imtixaannada waa xog khaas ah oo hoos timaadda Xeerka Ku dhaqanka Xogta ee Dowladda Minnesota, Sharciga Minnesota, Minnesota Statute 13.01 – 13.99. Macluumaadka noocan oo kale ah ayaa la soo aruuriyaa oo loo adeegsadaa qayb ka mid ah geeddi-socodka waxbarashada, qayb ahaan si loo go'aamiyo waxa ardaygu wax ku baranayo iyo waxa ardaygu u baahan yahay inuu barto. Degmadu sidoo kale way ururin kartaa macluumaadka ardayda marka loo baahdo si loo ilaaliyo nidaamka iyo anshaxa dugsiga. Xaaladaha qaarkood tani waxaa ku jiri kara xog gaar ah.

8.1.2 Ma jiro wax shuruud sharci ah oo ay tahay in ardaydu soo gudbiyaan xog noocaas ah, laakiin ku guuldaraysashada inay sidaas sameeyaan waxay, dabcan, ku yeelan doonaan natiijo toos ah fasalada lagu cabbiro qiimeynta macluumaadka noocaas ah. Xaaladaha qaarkood, ardayda waxaa laga yaabaa in looga baahdo inay wadaagaan xogta marka ay lagama maarmaan tahay in la dhowro nidaamka iyo anshaxa. Ka gaabinta bixinta macluumaadka kiisaska noocaas ah waxay horseedi kartaa ficil edbin ah.

8.1.3 Saraakiisha dugsiga ee degmada dugsiga waxay heli karaan oo adeegsan karaan xog aruurinta markii ay leeyihiin dano waxbarasho oo sharci ah xagga qiimeynta horumarka ardayga ama joogtaynta nidaamka iyo edbinta dugsiga. Macluumaadka noocaas ah waxaa loola tacaamulayaa in uu yahay macluumaad gaar ah marka la eego qodobada Xeerka Ku dhaqanka Xogta ee Dowladda Minnesota mana ahan in loo gudbiyo qayb sadexaad, in sharcigu u ogolaado maahane, si waafaqsan qodobada Xeerka Ku dhaqanka Xogta Dowladda Minnesota, Xeerka Waxbarashada Qoyska iyo Xeerka Qarsoonaanta(Family Educational Rights and Privacy Act) (FERPA) (20 U.S.C.1232[g] iyo 34 C.F.R. Qaybta 99), ayada oo aan la haysan fasaxa waalidka(diinta) ama mas'uulka(liyiinta) ardayga saqiirka ah ama ardayga da'diisu tahay 18 sanno ama kasii weyn.

8.1.4 Saraakiisha iskuulka sidoo kale waxay u adeegsan karaan xogta ardayga cilmi baarista, oo ay kujirto xogta ardayda la soo aruuriyay ama la soo uruuriyay ujeedooyin qiimeyn arday ah. Cilmi baaristu waxay noqon kartaa kobcinta, ansaxinta ama maamulida tijaabooyinka saadaalinta; in la maareeyo barnaamijyada kaalmada ardayda, ama in la wanaajiyo tilmaanta. Xogta ardayga ee la soo aruuriyay ama la soo uruuriyay ee loogu talagalay qiimeynta ardayda ayaa loo adeegsan karaa cilmi baaris ay kujirto, laakiin aan ku xaddidnayn daraasadaha habaynta, daraasadaha muddada dheer ama isku-dheellitirka iyo cilmi baarista kobaca. Waalidiinta, mas'uuliyiinta iyo ardayda qaangaarka ah waxay la xiriiri karaan degmada wixii su'aalo ah ee ku saabsan cilmi baaristaas oo sidoo kale way diidi karaan inay ka qeybgalaan qiimeynta ardayda qaarkood.

8.2 Macluumaadka kor lagu sharaxay degmada ayaa diiwaanadeeda waxbarashada ku haynaysa. Waxaa jira laba nidaam diiwaangelinta ardayda:

8.2.1 Diiwaanada wadareed, waxa laga ururinayaa dhammaan ardayda kujirta barnaamijka waxbarashada caadiga ah waxaana ku jira, laakiin aan ku xaddidnayn, guulaha kooxda iyo cabbiraadaha kartida, adeegyada Title I, adeegyada Bareyaasha Luqadda Ingiriisiga, Adeegyada Hibada iyo Kartida, soosaarista waxyaabaha la danaynayo, dhexgalka edbin, qoraallada iyo xogaha kale, iyo diiwaannada iyo qoraalada sida ku habboon, iyo

8.2.2 Xogaha daraasadda ilmaha waxa la soo aruuriyaa goorta adeegyada tooska ah iyo kuwa aan tooska ahayn iyo barnaamijyada la siinayo ardayda shaqsiga ah, waxaana ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, imtixaannada guusha ee shaqsi ahaan loo maamulo, imtixaannada dareenka iyo dhaqdhaqaaqa, cabbirrada caqliga iyo diiwaannada kale, qorshayaasha waxbarashadda shaqsiyeed, warbixinnada qiimaynta iyo diiwaanka iyo qoraalada sida ku habboon. Adeegyada iyo barnaamijyada noocaas ah waxaa kamid ah laakiin aan ku koobnayn adeegyada habka fikirka, adeegyada waxbarashada gaarka ah, adeegyada Title I, adeegyada Aradyga Luuqadda Ingiriiska iyo adeegyada Hibada iyo Kartida.

9. **Goobaha Xogaha** – Diiwaanada waxbarasho ee laga soo uruuriyay ardayda ayaa lagu hayaa meelo aamin ah oo ku yaal dugsiyada degmada.

9.1 Diiwaannada wadareed ayaa lagu hayaa dugsiga uu ardaygu dhigto. Markuu ardaygu qalin jabiyo ama laga wareejiyo Degmadda 196, diiwaanada waxaa lagu hayaa iskuulkii ugu dambeysay ee dhigashada hal sano. Hal sano kadib diiwaangelinta waxaa loo wareejiyaa xafiiska degmada oo loo kaydiyaa nidaamka sawirrada dhijitaalka ah.

9.2 Diiwaannada daraasadda ilmaha ee hadda ayaa lagu hayaa dugsiga uu ardaygu dhigto. Xogaha daraasadaha canugga ee hore waxaa loo gudbiyaa Xafiiska Degmada (3455 153rd Street West, Rosemount, Minnesota 55068-4946, telephone 651-423-7628) hal jeer sanadkii halkaas oo lagu kaydiyo hanaanka sawiridda casriga ah. Su'aalaha waxaa lagu hagaajin karaa Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah ama maamulaha dugsiga ardaygu dhigto.

9.3 Xogaha waxaa loo gudbiyaa shaqsiyaadka ka baxsan ama wakaaladaha oo keliya iyadoo la raacayo qodobbada ku xusan Xeerka Maamulka 505.2AR, Ilaalinta iyo Qarsoonaanta ee Xogta Ardayga.

9.4 Waalidiinta ama ardayda da'doodu tahay 18 sano ama kasii weyn waxay codsan karaan fursad ay ku baaraan xogaha iyo/ama in ay helaan nuqulo kamid ah xogaha si waafaqsan xeerarka Shuruucda Maamulka 505.2AR, Ilaalinta iyo Qarsoonaanta Xogaha Ardayga. Si ay balan u qabsadaan, Procedure 505.2.10P, Codsiga Waalidka ama Ardayga si uu u Baaro Xogaha iyo/ama uu u Helo Nuqulada Xogaha Waxabarashada, waa in la dhammaystiro loona gudbiyo maamulaha dugsiga ardaygu dhigto ama markii ugu danbaysay uu dhiganayay.

9.5 Siyaasadaha degmada, qawaaniinta iyo nidaamyada waxaa la soo dhigay websaytka degmada dugsiga.

10. **Cabashooyinka U hogaansami La'aanta** – Waalidka(diinta), mas'uulka(uuliyiinta), iyo ardayda da'doodu tahay 18 sano ama ka weyn waxay u soo gudbin karaan cabasho qoraal ah oo xadgudub ku ah xuquuqaha ay ogol yihiin 20 U.S.C. Farqada 1232(g) Xafiiska Siyaasadda Qarsoonaanta xogta Ardayga, ee Maraykanka. Waaxda Waxbarashada, 400 Maryland Avenue, SW; Washington, DC 20202-8520.

11. **Wixii Macluumaad Dheeraad ah** – Dib-u-eegistaan xuquuqaha macluumaadka asturnaanta ee ardayda, iyo waalidka(lidiinta) iyo mas'uulka(liyiinta) ee xogaha waxbarasho ee ay hayso degmada 196 waxaa loogu talagalay kaliya in lagu soo koobo qodobbada Xeerka Maamulka 505.2AR, Ilaalinta Qarsoonaanta iyo Xogaha Ardayga iyo sharciga gobolka iyo federaalka ee lagu dabaqi karo. Siyaasadda iyo shuruucda waxaa lagu heli karaa si onlaayn ah, dugsiga ama Xafiiska Degmada. Wixii su'aalo ah waa in lagu hagaajiyo: Golaha Guud Independent School District 196, 3455 153rd Street West, Rosemount, Minnesota 55068-4946, phone number 651-423-7883.